# Golaha Wakiilada JSL

## Waaxda Hadal Qoraalka

**Opened:- 09:49 AM** **Hansard No.18/2** **26/06/2012**

**Wasiirka Gaashaandhiga JSL oo Golaha Wakiilada Warbixin Siiyay.**

***Fadhigii 5aad ee Kal-fadhiga 18aad***

**Gudoomiyaha:-** *Waxaa fadhigan Gudoominayay* ***Md. C/raxamn Maxamed C/lahi (Cirro****), wuxuuna Quraankii furitaanka ka dib ku soo dhoweeyay hadalka Wasiirka Gaashaandhi* ***Md. Axmed X. Cali Cadami*** *si uu Golaha Warbixin uga siiyo hawlaha shaqo ee Qaranka Wasaaradiisu u hayso.*

**Md. Axmed X. Cali Cadami:-** marka hore Shirgudoonka iyo mudanayaasha waad salaaman tihiin, salaantaa ka dib, waxaan ku horeynayaa arrinta ciidamada, Ciidanka Qaranka Qaranka gaar ahaan waa sheeko dheer oo aan laga bixi Karin dhamaanteed, inaan sheegona daruuri maaha, inta muhiimka ah maadaama aan barlamaankii joogo waxaan ka bilaabayaa, ciidanku wuxuu ka hawl-gashan yahay dalka oo aan Meelaha waa weyn ahayn oo cududaha Somaliland ah wey jiraan, mudadii u danbeysay natiijada hawlgaladiisii laga qabtey ee tayaynta ahaa waxaa ka soo baxay natiij wanaagsan, waxaad moodaa maanta inay bilaabantahay natiijada aan sheegayo, weeraro lagu soo qaadey ama gaadmo lagu soo qaadey Ciidanka Qaranka Qaranka waxay muujisay feejignaantoodii, waxaana ka marag kacaya natiijooyinka ka soo baxay goobahaas.

Waxaa baryahan lagu hawlanaa oo dhowaan la bilaabey tirakoobka Ciidamada oo ah Mashruuca ugu weyn ee ugu adkaa, intaan wax kale la qaban oo darajooyin iyo lagaadhin tirakoobka Ciidanka Qaranka ayaa lagu hawlanaa, dhulkaa ciidama sida lagu qarameeyay waan iska garanaynaa, technically iyo beeluhu way wadaa socdeen tirada sidaasaa lagu saleynayay wax hawlyar may ahayn, iminkadan marxalada ugu danbeysay ee loo soo gudbay waxaa la gaadhay in la yidhaahdo intaynan wax kale sameyn aan tirakoob sameyno madax taabasho ah.

Mashruucan oo dhawr jeer la isku dayay oo lagu fashilmay, hada markaan bilawnayna dirqi baa lagu baxsaday oo is hortaag badan baa ka yimaada, hada mar hadi ciidankii filiqsanyahay oo mashriq iyo maqriba joogo way adkaatay in la sameeyo dadka horjoogayna kharash ku filan oo loo hayayna aanu jirin, waxaa khasab noqotay in la yiraahdo taliyayaasha Goobaha jooga 5 ama 10 baa loogu daray, hadhawna tiradaas ayaa la waayay oo dhibaato ayay noqotey ilaa ciidankii asbluubta, markii la soo tirakoobayay, dhowaan ayayna tiradii militerygu dhamaatey, iminkana waxaa dhamaadey tii booliiska, hubin baana lagu sameynayaa oo dibaa loo tirinayaa oo waa la saxayaa.

Dhalinyaro farabadan oo la garan karo inaanay booliiskii ahayn markii lagu arkay inay taliskii yimaadeen waxa khasab noqotey in labada qaybood ee Hargiesa ugu waaweyn iyo taliska guud ee booliiska hubin lagu sameeyo, militerygana waxaa hubin lagu sameynayaa oo dib loo tirinayaa Taliska guud inta magaalada laga saaro ayaa dibada lagu soo tirinayaa, tirakoobkaana waxaa ugu danbeeyay kuwa bariga sanaag Ciidanka Qaranka Biyo-guduud fadhiya oo ilaa kuwii

laasqorey joogay ay yimaadeen oo hadba laba ciidan baa la soo-saarey weyna dhamaatey tiradoodii iyaga iyo kuwa kale oo shaki laga qabey

Maanta nasiib wanaag qofkastoo Ciidanka Qaranka Qaranka ka tirsan wuxu leeyahay magac, sawir iyo informationkiisa sida xaaskiisa iyo da'diisa, alxamdu lilaahi tirakoobkaasi wuu dhamaadey, waxaa kaliyo ka hadhsan sidaan hore idiinku sheegay waxaa jira ciidan beeloodyo jira oo ciidan beeleedkaa aan dawladu siyaasad cad laga yeelay in laga kaaftoomi karo, iyaga recorkooda tirade waa la hayaa, hawlahaa ciidan ee qaranka u hayaa waxaa u dheer manta waxaa la qabtey 42 tahriibayaal meesha bariisley la yidhaahdo, waxaa la ilaalinayaa ciidamo la sheegay inay dhinaca bada ka soo galaaan oo ciidanku intey iskaashadaan gacan kageystaan, ilaa argagixiso, oo meesha la yiraahdo bariisley oo u dhaw lawyacado waxaa lagu qabtey nimar argagixo ah oo jabuuti ka soo baxsaday inta ay ciidankii gaadhi ka toogteen qabqabteen laguna celiyay Jabuuti iyaga gaadhigii langcruiserka ahaaba.

Markaa hawlgalka ciidanka iyo waajibaadka ciidanka laga rabaa wakhtiyadaa aan sheegayno oo dhacda oo difaaca ay ciidanku heeganka u yihiin oo aan hore qaarkood u dhici jirin oo budhcad badeedaasi iyo argagixisadu ka mid yihiin, dalka intaa le'egna ku filiqsanyihiin, wixii looga baahdona qabtaya, waa la dhameeyay in la soo tirakoobo Militeriga, bileyska iyo asluubta, waxaa jirey policy ahaa in lagu soo kobo number kala duwan oo waajibaadkoodu mideysanyahay lagu soo kobo,waxaa saamixi waayay dagaalada iyo xaalada lagu jiro, markaa wakhti iminka kaga haboon la sugo ayaa la isla gartey, way farabadantahay in dhagta laga maqlo ciidan baa halkaa jooga oo la jecelyahay inuu guuleysto, wakhtiga difaaca la sameynayo waxaa jira in loo baahdo dhaqaale farabadan oo wakhtigii nabada way kharash badan tahay oo ka gaajo badan tahay calooshu sidii markii nabada maaha cuntadii la karinayay la haleeli mayo oo waxaa loo baahanyahay cunto diyaara. Shidaal iyo saad ka farabadan oo lagu khasban yahay ayaa yimaada wakhtiga dalaalka lagu jiro hawlahaas oo dhan si hagar la'aana baa looga hawl galay.

Nabada waxbadan baa ku kaydsama, dagaalkana waxbadan oo aan lagu tala galin oo aad ku khasban tahay baa loo baahdaa oo ku baxa, markaa arrinta ciidamadu waa sidaa, arrinta kale ee aan doonayo inaan Golaha sharafta leh waxa weeye kutalagal miisaaniyadeed baa la sameeyay aanu budgetkeenu qaadi Karin, oo ah in store waaweyn baa la sameeyay oo ah kuwii hubka lagu kaydinayay hubka iyo wixii kale lagu xafidi lahaa oo cusbitaalo ku jiraan, Hargiesa iyo burco mooyee Gobolada inta kale waa loo qorey, waxaa dib u dhig oo caqabad ku noqdey oo aad la socotaan Go'aankii soo baxay oo inaga iyo xamarba la sheegay hoyatiin la'aanta oo argagixasadaa dhulka qaar soo gaadhay baa shakigaa abuurtey oo maadaama aanay habeenkii u hoyaynayn oo kuwii la soo diri inamo jaamacada ka baxay loo gayn lahaa oo tababarada bixin lahaa oo planka dhigi lahaa dib baa loo dhigay laakiin xakadkaas baa kuyimi oo cusbataalkii Burcaa u danbeeyay.

Kii Hargeysana way dhameystireen, xeryo ciidan oo halkan laga sameeyay wey jiraan, wey yimaadaan nimarka safiirka ah oo iyagoon habeenimo sugin bay noqdaan, intaas ayaan kusoo gabagabaynayaa, wixii kale su'aalaha aad I weydiinaysaan baan u dhiganayaa, waad salaamantihiin.

**Su'aalaha Wasiirka La weydiiyay:-**

**1. Md. Ibrahim Axmed Haybe:-** Wasiirka aad iyo aad baan ugu mahadnaqayaa warbixinta uu nasiiyay, waxaan weydiinayaa dhowr suaalood

1. Inuu iftiimin naga siiyo jiidaha ay dagaaladu ka socdeen had iyo goor dagaaladu ka socdeen sida kalshaale bal waxay xukuumad ahaan ka damacsanyihiin si dagaaladaa loo qaboojiyo?
2. Wasiir waxaad sheegtay in Ciidamada Qaranku Gobolada dalkoo dhan ka hawgalaan maxaad uga sheegtaa Ciidanka Qaranka qaranku waajibkiisa kowaad waa difaaca xuduudaha dalka, haday wax soo kordhaan waxaa soo kordhay wuu ka qabgali karaa, muxuu hadaba ka qabtaa gobolada uu ka hawlgalo?
3. Waxaad sheegtay ciidan beeloodyo maxay tahay shaqadoodu xagayse ka hawlgalaan?
4. Waxaa jira Naafo Ciidanka Qaranka qaranka, waxaynu ognahay in Ciidanka Qaranka booliisku uu naafadiisii gacanta ku hayo, Ciidanka Qaranka asluubtuna sidoo kale, maxaa Ciidanka Qaranka qaranka Naafadiisii iyo Agoomihiisii Hoosgeeyay Hay'ada NDC?

**Md. Cadami:-** 1**.** su'asha halka xaalada dagaaladu marayaan, Ibrahim malaha afkaguun buu ka doonayaaye idaacadaha inta laga dhagaysto uun weeye, laakin haday wasaarada shaqadeedii tahay hadeer wax dagaala oo socdaa ma jiraan, waraaq baa aroortii la bixiyaa war subaxeed markaa maalmahan waxaa ku qornaa inaanay wax dagaali socon.

2. Difaaha Qaranka Gobolada, Hargiesa ugu weyn oo caasimadii ah dagaal ka socdaana ma jiro, ciidankiina wuu joogaa oo waa taliskii ugu weynaa, sidaa darted ayay gobolada kale sidaa si le'eg hawlaha kale aan sheegay iyo hadii ilaahay inaguma keenee wax soo kordhaan inay difaacaan oo ka hawlgalaan weeye oo wey joogaan Gobolada Dalkoo dhan.

3. Ciidan beeloodku wuxuu qabtaa wax ku dhow wax ay qabtaan Ciidanka Qaranka qaranku marka aaga joogaan dagaal ka dhaco, waxaa kaloo qabtaan inaanay kuu soo raaci ciidan kale oo cadaw oo waad iska neutralize garaysay marka wixii la bixinayayna isaga la siiyo, wakhti baa loo qabtey bishii March oo waxaa la yidhi wixii tababar qaadankaraa ay qaataan, laakiin wali lama wada dhimin maadaama xaaladaha aynu wada ognahay jiraan.

4. waa su'aal fiican lamadibin daabiyeen, waxaa la yidhi Ciidanka Qaranka shaqeynaya ee hawshii ku jira iyo Ciidanka Qaranka hawlgabay ama naafoobay caalamka laba siyood baa loo kala dhaqaa, markaa inaga waxaad moodaa waa wada active kan goobta jooga iyo kan 10 sano ka hor ay ugu danbeysay lacag bay wada qaataan raashina wey wada qaataan, wasarada ayayna budget ka ugu jirtey oo ay ka muuqanaysay, sidii aad idinkuba ku baasgarayseen waxaa la yidhi waa abaabulkasaar oo xagaasaa budgetkoodiina loogu wareejiyay oo meeshaa ayaa la yidhi halugu sii dhaqaaleeyo ciidankii difaaca dalka ku dhaawacmay.

**2. Md. Xariir Siciid Bulaale:-** 1. Wasiirka Gaashaandhiga aad baad u mahadsantahay, mudane Wasiir waxaa jirta halkaa uu Ibraahim Magacaabayay kalshaale iyo Buuhoodle dhexdooda waxaa ka jirta in ciidan aan leenahay uu daganyahay, waxaana dagan Beelo Somaliland taabacsan, waxaana ka soo horjeeda beelo ka soo horjeeda Somaliland, Ciidanka Qaranka Halkaa Dagan ee Qaranka Ciidan baa horfadhiya, waxaa jirta in maalmahan danbe Ciidanka Qarankaa beelaysan ee Ciidanka Qaranka qaranka horfadhiyaa ay qaabkii dagaal u badaleen in beelaha

Somaliland taabacsan oo Hub ka dhigis lagu sameeyay uu weeraro, waxaa jirta meel 1km u jirta Ciidanka Qaranka qaranka in ciidamada xagaa ka soo jeeda shacabka ku weeraraan waxaana Ciidanka Qaranka qaranka amar lagu siiyay in Ciidanka Qaranka shicibkaa laynaya aanay cidi u tagin, marka beesha Somaliland taabacsan hubkoodii kaa qaranka uu yahay, waa maxay siyaasada aynu ka leenahay inaanay Ciidanka Qaranka qaranku u gurman Shacabkaa tiknikada lagu laynayo ee u dhow?

**Md. Cadami: -** horta dad muwaadiniin ah oo ciidamo lagu fasaxay oo la yidhi laaya oo hubkiina kaga dharga u biximaayee anigu ma ogi go'aan taliska Ciidanka Qaranka ka soo baxay maaha, anigoo og inaad deegaanka u dhalatay oo aan ku beeninay anigu taas maan ogayn, laakiin waxaan ogahay, in guurti u soo kicitimay inay nabadii ka qaybgalaan markii horena afka ka sheegay, reer buuhoodlaan sheegayaa in dhexda loo galay in buuhoodle laguna noqdey oo qaarkood inta la xidhxidhay taas uun baan ogahay……

**3. Md. C/raxman Maxamed Jaamac**: - Marka hore Wasiirka Gaashaandhiga waad salaamantahay Golahana ku soo dhowaw, Mudane waxaan ku weydiinayaa 4 su'aalood oo kookooban.

1. Dhowaan waxaa magaalada tukaraq qabsaday Ciidanka Qaranka qaranka markii danbena ka soobaxay, su'aasheydu waxay tahay Magacan Saar baad la leedihiin puntland, mise si kale ayay wax u jiraan?
2. Dhowr iyo labaatankii qof ee aad maxkamada gaysay gudaha iyo dibadana la idinkaga cambaareeyay sababtuna waxay tahay qaabka loo xukumay uu ka soo horjeedo sharciyada wadanka ka jirta, markaa Mudane Wasiir magaynaysaa Maxakamadii ku habooneyd?
3. Waxaad sheegtay in Ciidanka Qaranka laasqorey la tirakoobay, waxaan warbaahinta ka dhageysanay iyadoo la daawanayo in reer puntland deked ka dhisayso markaa siday isu qabaneysaa?
4. Ciidan beeleedyo ayaa jira baad tiri dawladu mushahar siiyo, waan ognahay inaanay dawladeenu awoodu gaadhin dadka in lawada qarameeyo, oo ciidan beeleedka dalcad inoo ah in la adeegsado, waxaa dhowaan Magaalada Gawsaweyne la sheegay in dilal weerar ah ka gaysteen ciidan beeloodyada Somaliland taabacsan taa run iyo been waxay tahay Wasiirka noo cadee?

**Md. Cadami Wasiirka Gaashaandhiga:- 1**. Tukaraq Ciidankeena qabsaday, waana ka soo baxay ka dib ciidan kala oo puntland baa qabsaday, Maxeelad kalaa jirta mise xidhiidh ayaa jira puntland ka dhaxeeya, Markii ciidanku qabsaday ciidan dhor-goor gaadmo ku yimi baa looga jawaabayay wuuna ka baxay wax ku dhinteyna ma jirto in la sii joogo baa fiicnayd buu caqliga fiican odhanayaa mar haday awood ku qabsadeen, laakiin qolo aniga arrimaha Militeryga iga badisaa oo anigu hasha kuma jirin oo qoladaa iga badisa ee iiga aqoonta sareysa Militeriga ayaa dhigay, malaha marka danbaan soo kaxayn doonaa Genenka Militeriga si uu uga jawaabo taa, laakiin sidaan u arkayo qiyaas ku talagal ah baa fiican rag military ee la iskagama habsado meel kasta, oo halkii Ciidanka Qaranka xamaamtu u tiiley ee difaaca kaga jirey ma kaga martaa weeye ileyn ciidanku ilaa ceergaabo ayuu jagac ku siinkaraye, Wax gacan saara ahina ma jirto, dee Malaha wey soo socotaa baan u maleynayaa kkkkkkkkkkkkkk ( kaftan).

**2**. Maxkamadii, hadaan C/raxman markuu warqada qoreyay ogaan lahaa waxaan odhan lahaa dib inoogu dhig, laakiin iminka waan ka jawaabayaa, waxaan ogahay oo aan ilaa iminka anigoon odhanayn xukunkaasi waa baadil sida dadku yidhaahdaan, baadilina waxaa odhan kara nin kaa kitaabo, aqoon iyo sharci badan oo kaaga aqoon badan kaas uun baad beenin kara sharci uu ka dhawaaqey nin kaaaga aqoon badan, anigu waxaanse taa xogogaal ka ahay oo aan ogahay in arrintaa dib loogu noqon doono oo la isaga arki doono maxkamada la geyn doon anigu ma specifygareyn karo oo ma odhan karo taasaa la geynayaa, laakiin in dib loogu noqon doono uun baan idiin sheegayaa.

**3**. laasqorey, waxaa isu kaa qabanla ciidan lacag qaataa waa joogaan oo military la soo tiriyay waxaana joogo Puntland oo qabsatey, puntland mey qabsan laasqorey, laakiin waxaa qabsadey niman dhalinyaro ah oo dibadaha ka yimi oo shirkado iyo qolyo la soo heshiiyay, oo is yidhi lacagta iyo cilmigaad soo barateen uga faa'ideeya deegaankiina, waxaa daa'iman ka jira tartan wixii 100 km ka yar dekadaha isu jira, waxa isu dhow boosaaso iyo Laasqorey oo isu dhow, inaga dekadeheeni yar yaraa inooma dhisna, oo dekadeena weyn ee berbera uma dhowa laasqorey, iyadoo sidaasa waxaa dhacay in mar hore la isku deyay inay dhisto oo lacag ururisay talyaanigu lacag buu balan qaadey inuu bixiyo markan markii ka horeysay, qoladii hore ee hawshaa waday way ka ilbaxsanaayeen oo Somaliland bay ku soo horeeyeen oo waxay codsadeen in qalabka ay la soo degayso cashuurta laga dhaafo, wixii Somaliland la qaban kartona ay la qabato, qoladaa puntland is aanay ugu soo duulin waxbay u sheegeen waxay yiraahdeen waxaan sameynanaa mashruuc kaluumeysi markaa nabad ma idinka heleynaa, qoladaa faraskoodii baa la gaabiyay lacagtii talyaanigu bixinayayna wey joogsatey waxaana u sabab ahaa dadkii la afduubey ee buurta lalagaley oo sumcadii meesha ayaa dhimatey.

qoladan iyagana looma yareysane qoladii ciidankeenii bada maadaama aan la tusin wax meesha laga wado wey weerareen, markaa waa la is rasaaseeyay oo dhaaca culus baa khasaare jirey, waxaan markaa leeyahay nin tuur lihi siduu u seexdo wuu yaqaane oo waxay yiraahdeen Somaliland iyo puntlandba inaan nabadgalyo ka helnaanu dooneynaa, qolyo ka xariifsan inay yimaadaan oo inaga koobaan wey dhici kartaa, hada waxaa jooga badhansaabkii badhan baa jooga laasqorey oo wuu la Hadley weyna soo dhoweeyeen, may odhan yaanu badhansaabku noo iman iyo cagaha dhulka ha ka qaado, markaa xaaladaasi waa sidaa.

**4**. Ciidan beeleedkaa kuu hadhay baan filayaa, Ciidan beeleedku lacagta ka qaata Somaliland waa nimanka soo sheegay oo baabuurka lamberkiisa iyo warkoo dhan soo tabiyay weeye, ee iyagu maaha nimanka falka gaystey.

**Md. Xuseen Caabi: - 1.** xerada bir jeex waa xero caan ah oo aan wada ogsoonahay ciidankuna dagan yahay markaa barigii hore waxaa jiri jirtay in cidan kana wax labarijiray qoriguun lama bari jirine waxaa ka mid ahaa wax yaabaha labara jiray sida Egineerinka kaarba tariga iyo wax yaabaha dayac tirka u baahan iyo farsamooyin kale marakaa ciidan ku maleeyihiin dadkii farsamo yaqaan ka ahaa ee hawlahaa qaban jiray hadii se ay leeyihiin iska daa dad wax ay u qabtaane dhulka ay ku jiraan maxay u dayac tiri waayeen? Meeshu se ma meel ciidan ciidanii joogaanabaa mise ma ahan?

**2.** Meeshan Gawsa Wayne ama ceel bardaale ma ciidan qaran baa jooga mise ciidan boolis ayay se tahay shaqadeedu?

**3.** Mudane wasiir had iyo jeer waxaad tidhaa tirakoobkii mad madaw badan baa ku jira, tira koobkaasuna in taas oo wasiir ayuu galaaftay oo wasiirku marka uu u koco dhankaa iyo tirakoob waa la khaarajiyaa markaa maxay tahay balaayada hortaagan ee la furdaaminkari laaya ay 21 sano ma arin technical ah baa mise waa caag layaasha oo meesha ayay u tahay meel ay maalaan?

**4.** Ciidanku ciidan Qaran mayahay oo qalabka ka wada siman Gobolada oo dhan oo si cadaalada loogu qaybiyay?

**5.** Barigii hore ciidamada waa la naadin jiray oo la odhan jiray ciidan qaran ayaa la qorayaa ayaa la odhan jiray Gobolada iyo Degmooyinka waa laga naadin jiray waxaana lagu xulan jiray criteria ciidan ku yaqaano maantana ma hayno ama maanu maqal kaliya waxaan maqalaa qori ayaa la raadinayaa, markaa nidaam kee ayaa loo qoraa ma hoos ahaan ayaa loo qaraa?

**Md. Cadami Wasiirka Gaashaandhiga :-** Farsamo yaqaano qaar waa joogaan oo barigii dhaweydna qaar waa na raaceen oo tiknikada bari taala waa soo eegeen waxay qabaan iyo wax ayaabaha aya u baahan yihiin soona qoray markaa yeelkadeedee xeradaasi waa mashruuc dheer dib u noolayn teedu kharash badan aya u baahan tahay, bari dhawey qisaa dhacday oo nin janan ah ayaa inoo yimidey oo xeradeena tahay waxaanu ku arkay taangiyo badan iyoo qalabkii ruushka oo yaala la ranjiyeeya oo aanay waxba ka dhicin markaas ayuu yidhi maxaad ranjiga ugu khasaariseen markaa waxaa wada socda wax qabadka iyo in wixii la casriyeeyo. Waxaana xerada loo ilaa linayaa in hantida qaranka la ilaaliyo sida wasaaradaha kalaba loo ilaa liyo xeryahaana waa in aan la dhaxal wareejin ee la dhawro waayo weerar badan ayaa ku socda

2. Ceel bardaale iyo kalshaale sidaa aad aduuba sheegtay arinta ka jirtana xog ogaal ayay nu u wada nahay, beena maaha hadii aynu nidhaa way raagtay oo mashaariic ayay noqdeen danbi la inoo qorimaayo, hadii dhanka alle hadayna ka dhamaana waxba ma dhamaadaan, hadana arinkaasi waa uu soo dhawaadoo reerihii meelahaa daganaa kumay kala guurin oo way wada yaalaan lamana kala qixin, shaqada aan haynaana waa mid iska cadahay mar ugu horeysa ee meel rabshadi ka dhacdo waxaa tagaya bileyska wixii ay ka qaban karaana way ka qabtaan, wixii gurmad ah ee ay uga baahdaan cidan ka milatari way dalban karaan, hadii se ay wax ka qaban karaana way ka qabtaan.

3. Dhanka tirakoobka lama ogola dadbadana wey galaafatay, anigana way i bajisoo way yidhaah deen khatar ayaad ku jirtaa, markaa aniga sanad kii labaad ayay bili iiga hadhay walina salam ayaan ahay tirakoobkiina 98% waa uu dhamaadey rikoodh kiina waa la sameeyay, wixii nasiib kiisu ku dhiman lahaan ha ku dhinto , cidii ka cadhoon lahaydna ha ka cadhooto, run ahaantiina dhibaato waa laga maray, lakiin hadana waa la dhamaystiray, meelaha aan kuu sheegayana tiradooda iyo lan barkiina waa lahayaa arin kaasna wax hada dib u dhacay oo la sugayo maahan.

4. Ciidanka Qaranka qaybsanaan tiisa makaan ka hadlo ma qaybsana waana sidii lagu qarameeyay waynu ognahay duruuftii jirtayna weynu ognahay, waxaa arinkaa la gali karayaa oo isu badal dhab ah la samayn karayaa mar haday tiradii dhamaatay, wakhtiga hada la wado oo ay ku jirto gudidii la sameeyay ay maga caanban tahay oo darajada la bixinayo isu dheeli tirkaa ay Gobolada iyo Degmooyinku aya lahaayeen markaa ayay ugu dhawdahay in la sameeyo laguna talo galayaa, lakiin markii hore waxay ahayd …… wixii cidan kooda ee

tiknikadooda wata waa la qarameynayay  waana la qaadanayay markaa sida aynu wada naqaano dheeli tir ma jirin.

5. Dhanka naadinta wax badan oo la naadin jiray ma jiraan oo hada lama naadiyo oo naadadiiba waa ay joogsatay, dhanka milatariga waxaa la yidhaa waa sir arinkaasi oo hadaad tidhaa 200 ee reer warfaa iyo 200 oo reer jaamaca waa lagaa gaashamanayaa ayaa laga rabaa in ay is ka soo xaadiriyaan barito dad is ka hurday ayaad kicineysaa markaa farsamada dheeli tirka lagu samayn karaa way farabadan tahay

**Md. Cali Obsiiye Diiriye:  1.** Mar u ciidan keenu uu weeran galayo halkeebaa kuu hogaamin ah adiga?

2. Dagaal kadis kugu soo dhacay oo aad ciidan kii jabiso kadina aad raaxaysato kadibna aad tidhaa waxba ma laha oo aad dib uga soo saarto miyaanay ahayn in nin walba meeshiisa uu difaac ka galo ilaa in ta uu sugayo nabad galyadiisa?  Maxaase diidaya in aad ku deysaan halaaka ilaa in tau u nabad galyada sugayo?  Maxaase diidey in uu halkaa ciidan ku dego oo uu xuduudaha sugo?

3. Hada waxaaa socda wada hadalada Somalia iyo Somaliland waxaan is hor fadhiisanaya maxdexweynayaal, wasiiro, saraakiil, maraa ma waxaa rabtaan in ay is hor fadhiistaan iyoga oo madhan oo aan lahayn wax darajo ah raga dhuuntu casaatay? Se miyayna ahayn I loo soo dadajiyo darajooyinka.

**Md.  Cadami: - 1.** Sida aad sheegtay waa runtaa wayna jirtaa hadey taliska tahay iyo haday tahay wasiirada iyo cida hawsha wadaaba weytagaan oo dad saraakiil ah ba wey joogaan gobolada iyo degmooyinkaba

**2.** Dhanka kale kala soo baxaa degdega ah iyo in meshaa lagu nagaadaaba waa ay jiraan lakiin waa xeelad dagaal lakiin labaduba waa laba tikniika ku jirta allaahu aclam midka labadaa saxda ah.

**3**. Waxaa taageersanahay  tanu maaha tii sanadada loo tirinayay hadana  waa lagu jiraa darajo bixintu waxaan ku sii guda jira dheli tirka gobolada waana hawl culus darajo bixntu, cidan kana waxaa lagu salaynayaa inta uu yahay imisa kornayl ayuu yeelan karaa jaranaaladuna aad ayay inoogu badan yihiine miyay nu sii kordhinaa mise waa la dhimaa intii uu burburku dhacayna meeshaad martaba janan ayaa jooga kii xabad sidan jirayba waxaa uu noqdey janan qar reerkooda ayaaba siiyay markuu difaacii galey. Mar hadii wada hadaladuna ay bilaab meen arinkaa waa la qaadanaya waana talo wanaag san waana lagu camal fali insha Allaah.

**Md.  Ibrahim Caraale Cabdi:- 1.** Magaalada la yidhaa Gowsa weyne oo ku taala xadka ugu sokeeya ee gobolka sanaag in lagu laayay dad tiraba ay afar nin ku dhinteen sadexna aya ku dhaawacmeen mudadaa ka dan baeysayna ka sheegayo in ay nabad galyo daro ay ka jirto oo dadkii falkaa geystayna ayna ka fogayn aagaa oo xukuumaduna ayna wax dhaqdhaqaaqa oo ay samaysayna wax xog ah aanan ku ahayn,

Hadii wixii laga baqayay ee laga digayay eeaan idiin soo gudbiney dhaceen ma shacabkaa mar kaa leynaysaan oo qoryahooda qaataan isna difaacaan? Mise dawladu waxay geynaysaa ciidan ayay geynaysaa oo talo aya ka leedahay jida intaa leegi?

**Md. Cadami: - 1.** Waa su'aal aad u fican halkaa shil baa ka dhacay kuligeena waan ka wada xunahay dadkaa shacabka ee is ka joogay degaan koda dabadeedna la laa yay arinakaasna damqashadiisa ayuu leeyahay dawladuna arinkaa waa ku jirtaa waana dhul aad u baaxad weyn arinkaana dawladu waa ka hawl gashay waana lagu gudo jiraa arinkaa wixii awoodeena ahna waa lagu gudo jiraa.

**Md. Ali Xaaji Maxamed**

1. Soo jeedin

**Cadmi waa uu mahad naqay waxaanu u sheegay in balan sanaayeen se aanu joogin ciidan kuna waa ciidan qaran laguna talo**

**Md. Cumar san weyne: - 1.** Ciidanka Qaranka ayaa dadka dhulka ka booba markaa wasiir ma isu daydeen waxaad tihiin ha'aydda uga waa weyn ama ugu baworka wayn e in aad gudi u saartaan oo cidanka iyo dadka aad kala saartaan Oo aanay is nicin dadka iyo ciidanku?

**Md. Cadmi: - 1.** Waa la sameeeyay oo qaarka mida milatariaga iyo dadka xog ogaalka u ah aya la sameeya iyo qaar isu badaley wasaarada daakhiliga ayaa lagu daray, waxanan is leenahay ha soo afjarmaan dac wadahaasi, Dhan ka kale cid la soo weerarayaa waa cidan ka milatariga iyo xeryahooda baan qabnaa, taasi waa malayn waxaa kale oo xaqiiqada la ogaanayaa cida wax boobaysa iyo cida la boobayaba marka ay tagaan goobahaa. Maamulkii baa lahayaa dhulka ay leedahayna documenta ayaa lahayaa, xitaa dawlada hoose iyo wasaarada hawlaga guud iyaguna document ayay hayaan dhulka dawladu leedahay, Wasaaradaana waa lagu daray, arinkaan waxaa lagu saxayaa mar loo yeedho dadkii bixiyay, maayarka iyo dawlada hoose iyo qolada milatariga sidaa ayay dadki ku kal qancaan ayna ku kal baxayaan, Meelaha xaasigaana waan yara hakinaa

**Md.Ahmed Ducaale:- 1.** Arikaa gawsa weyne ayaan ka hadlayaaye meeshaaa dadka lagu laayay waxay Oog waxay u jirtaa 20 km ciidankuna waaka ilaa ganbadha fadhiya markaa xagey dableydaasi ka soo dhaafeen ciidan?

2. Dhaliisha ma idinkaa leh mise wasaarada daakhiliga?

**Md. Cadami: - 1.** Meeshaa arin fool xuna ayaa ka dhacdey waana la baadhayaa arinkaasi sida uu u dhacay waxaana la samayn doonaa sidii loo dajin lahaa arinkaa waana laga hawl galayaa hadii eebe idmo waad mahad san tihiin.

**Cawad Cali Maxamed** — **Agaasimaha Waaxda Hadal Qoraalka G/Wakiilada JSL**

**C/risaaq Siciid Ayaanle** — **Xoghayaha Guud ee G/ Wakiilada JSL**